**Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda 2 Disember 1958, lamba. 1131.**

**Wax-kabeddela Sharciga Sanduuqa wareegga lacagta ee Soomaaliya.**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay qodobka 4aad, ee sharciga 30 Juunyo 1954, lamba. 677;

Markuu arkay Qodobka 12, ee xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda 5 Maarso 1955, lamba. 371, oo xeerar u dejinaya shaqaynta hayadda Sharciga Guud “Sanduuqa xagga wareegga lacagaha, ee Soomaaliya”;

Markuu Aqoonsaday baahida loo qabo in wax-kabeddel laga beddelo Sharciga Sanduuqa wareegga lacagaha, ee Soomaaliya, oo lago ansixiyey (ogglaaday) xeerka kor lagu soo xigtay, ee Mada xweynaha Jamhuuriyadda, ee 5 Maarso 1955, lambar 371;

Ayada oo lagu saleynayo soojeedinta Wasiirrada Kansiga iyo Arrimaha Dibedda;

## WUXUU XEERAYAA

Qodobbada soo socda, ee Sharciga Sanduuqa wareegga Lacagta, ee Soomaaliya, oo lagu oggolaaday (ansixiyey) Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ee 5 Maarso 1955, lamba. 371, waxaa loo beddelay sida soo socota:

Qodobka 1, waxaa laga daray (la dhexgeliyey) bilowga saddexaad ee soo socda:

“Sí uu u fuliyo xilalkiisa, Sanduuqa Wareegga Lacagta, ee Soomaaliya, waxa uu ku shaqaynayaa laba qaybood oo kala duwan, qaybo lagu magacaabo “ Qaybta soo-saaridda” iyo tan kalana “Qaybta bangiyeed”.

Qodobka 2aad, bilowgiisa labaad waxaa loo beddelayaa sida soo socota:

“Sanduugu waxaa uu Agaasinka Guud ka dhigi karaa Muqdisho, xarumo, laamo iyo wakiillana ka furi karaa dhulka Soomaaliya”.

Qododbka5aad, faqradda koowaad waxaa loo qaybiyay sidan soo socota, laba faqradood oo kala duwan; ee faqraddalabaad ee hadda, waxaa la tirtiray ereyada, "Waana la xaqiijin karaa"; waxaa la geliyey faqrad lixaad:

«Guddoomiyaha Golaha Sanduuqa waxaa doorta Wasiirrada khasnadda iyo arrimaha dibedda iyadoo la ilaalinaya marla la magacaabayo, axkaamta qodobka 4aad, ee xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ee 5-tii Maarso, 1955, n. 371".

Goluhu wuxuu ka kooban yahay:

a) lix xubnood oo laga soo kala xulay dad sí gaar ah khiburo u ah, oo ay magacaabeen: laba Wasaaradda Arrimaha Dibedda, oo mid ka mid ah xilkiisu yahay ku-xigeenka Guddoomiyaha, midna Wasaaradda Khasnada, mid Wasaaradda Ganacsiga Dibedda, mid Bangiga. Talyaaniga iyo mid ka socda Xafiiska Sarrifka Talyaaniga;
b) afar xubnood oo ay magacaabayo Maamulka Wasaayada, ee Soomaaliya, ka dib markay la dhegeysto Xukuumadda Soomaaliya.

Lama mid noqon karaa Golaha, Maamulayaasha, madaxda uu magacaabo milkiilaha, duqowda magaalooyinka, madaxda iyo shaqaalaha shirkadaha amaahda ee ka howlgala Soomaaliya».

Qodobka 6aad, xarfaha f) iyo g), waxaa loo beddelay sidan soo socota:

"f) waxa uu go'aaminayaa xeerarka iyo shuruudaha howlgallada Sanduuqa lacagta ee lagu tilmaamay qodobka 15-marcelis, marka Sanduuqu la wareego adeegyada khasnadeed asaga oo uga wakiil Maamulka Wasaayada Talyaaniga,ee Soomaaliya iyo Xukuumadda Soomaaliya, wixii nusqaan ah oo soo baxa kama badan karaan

dabarucaadka loo qoondeeyo Maamuulka Wasaayada, ee Soomaaliya, iyo Xukuumadda, oo toban meelood loo qaybiyo hal meel.
«g) wuxuu sameynayaa (cayimayaa) xarunta Agaasinka Guud wuxuuna fadhiyo,xafiisyo iyo laamo wakiillo ah ka furanayaa dhulka Soomaaliya".
Xarafka h) waxaa loo kabayaa sidan soo socota: "waxaa kaloo dejinayaa la dhaqanka sharciga iyo dhaqaalaha ee shaqaalaha, oo uu kujiro Agaasimaha Guud, wuxuuna go'aamiyaa qaabdhismoodkooda, oo uu oggolaado (ansixiyo) Wasaaradda Khasnada iyada oo lala tashanayo Wasaaradda Arrimaha Dibedda, waxa uuna sameeyaa shaqaale qorista.

Xarfaha i) iyo l waxaa lagu beddelay kuwa soo socda:

«i) waxa uu magacaabayaa kuwa u-dhigma Sanduuqa ee gudaha iyo dibeddaba;

«l) wuxuu dejinayaa xeer-nidaamyada khuseeya socodka shaqada, hawlgallada, iyo adeegyada Sanduuqa; "

«m) wuxuu u soo jeedineysaa hay'adaha korjoogteynta ee awooda u leh qiyaasta sicir-dhimista iyo hormariska waxa uuna go'aan ka gaarayaa taase kasta oo kale iyo shuruudaha lagu dabaqi karo amaahda iyo dhigaalka;

«n) wuxuu dejinayaa dibaajiyada saraakiisha, qasnajiyeyaasha iyo noocyada kale ee dammaanaadka; wuxuu ansaxinayaa sii deynta dhigaalka iyo joojinta noocyada dammaanadaha iyo bixinta qaababka kale, ee damaanaadka kor lagu soo sheegay;

«o) wuxuu baarayaa oo qaraar ka qaadanayaa miisaaniyadda sanadlaha ah iyo xisaabta macaashka (faa iidooyinka), kharashaadka iyo waxyaabaha luma, una diyaariyo inuu ubandhigo xisaab-hubiya iyo Wasiirada Khasnada iyo Arrimaha Dibedda xagga ansixinta; 15-marcelis. - «Sanduuqa waxa uu fulinayaa, ayada oo loo siimarayo qeynbta bangiyada, howlaha iyo adeegyada soo socda: kambiyaalayaasha iyo jeegagga bangiyada, in lagu fiiriyo dhicidda aan badneyn seddex bilood, oo maslaxada u ah shirkadaha amaahda ee ka howlgalaayey Soomaaliya ugu yaraan lix bilood;

«p) wuxuu idmayaa heshiisyada ku lug leh iibinta hantida maguurtada ah iyo macaamilooyinka, heshiisyada iyo wareejinta khuseeya amaahda lacagaha ka badan Lire 4,375,000 oo wax ka yiraahda dhammaan heshiisyada kale iyo tallaabooyinka sharciga ah oo, muhiimaddooda darteed, madaxweynaha u arko hos keeno awooddiisa iyo oggolaanshahiisa;

«q) wuxuu awood u leeyahay inuu Muqdisho ka dhiso guddi fulin, oo ka kooban Agaasimaha Guud iyo laba xubnood oo uu isla goluhu magacaabo, oo ikhtisaaskiisa ku jira.

«r) waxa uu fuliynayaa waajibaadka kale ee loo igmaday ee ku saabsan arrimaha lacagaha iyo lacagta shisheeye (ee adag) oo ay jirto danta dhulka (gayiga) Soomaaliya".

Qododbka 8aad, faqradda koowaad waxaa loo baddalay sida soo socota:
"Si go'aannada Goluhu u ansaxaan , waa in ay goobjoog ahaadaan ugu yaraan lix ka mid ah xubnaha".

Qodobka 12aad, faqradihiisa I, II iyo III waxaa wax looga beddelay sida soo socota:
"Guddiga Xisaab-hubiyeyaasha wuxuu ka kooban yahay shan xubnood oo joogto ah iyo laba beddiil u ah."

Shanta xisaab-hubiyeyaal joogtada ah waxaa lookala magacaabaya: hal Wasaaradda Arrimaha Dibedda, laba Wasaaradda Khasnada, oo mid ka mid ah uu deggan yahay Soomaaliya, mid Wasaaradda Ganacsiga Shisheeye iyo mid Maamulaha Wasaayada, ee Soomaaliya, ayada oo la dhegeysanayo Xukuumadda Soomaaliya; beddiillada waxaa soo kala

magacaabaya Wasaaradda Khasnadda iyo Maamulaha Wasaayada, ee Soomaaliya.

Xisaab-hubiyeyaasha waxaa lagu magacaabayaa xeerka Wasiirka Khasnadda iyadoo lala heshiiyey Wasiirka Arrimaha Dibadda. Isla xeertadaas wxaa lagu magacaabaya Guddoomiyaha Guddiga Xisaab-hubiyeyaasha».

Qodobka 15aad, waxaa wax looga beddelay sidan soo socota:

«Sanduuqa waxaa looga baahan yahay inuu lahaado keyd damaanad ah, oo ka kooban dahab, qalin iyo lacago qalaad, qaddar u dhigma lacagta xaashida ah oo la soo saaray iyo sí waafaqsan Axdiga ku xusan qodobka hore, oo ansixin loogu gudbinayo Wasiirrada Khasnadda iyo arrimaha Dibadda,.

Sanduuqu kuma khasbana inuu lahaado keyd damaanad xagga soo saarista lacagta birta, laakiin waa inay maalgaliyaa saami amaaheed, ee Dawladda Soomaaliya ama ay damaanad qaaddaa ay Jamhuuriyadda Talyaaniga dammaanadqaaddo qiimaha soo-saaridda marka loo eego kharashka».

Qodobka 15aad-bis, sanduuqu wuxuu fuliyaa_hawlaha iyo adeegyada soo socda iyada oo loo marayo Qaybta Bangiyada:

1) Dib-u-dejinta biilasha sarifka lacagaha iyo jeegagga bangiyada, iyada oo qaan-gaar ah oo aan ka badnayn saddex bilood, iyada oo loo eegayo shirkadaha deynta ee ka shaqeeya Shirkadda ugu yaraan lix bilood;
2) soo-saarid jeegag wareega iyo jeegagga bangiyeedda;
3) maalgashiga saamiyo amaaheed guud ama leh dammaanad guud oo laga soo saaray dhulka Soomaaliya iyo sidoo kale ay bixisay Jamhuuriyadda Talyaaniga ama ayadu damaanadqaaday ilaa xadka uu Goluhu go'aamiyo, ka dib markii uu la tashaday Wasiirrada Khasnadda (kansiga) iyo Arrimaha Dibadda;
4) gadashada iyo iibinta dahabka iyo lacagta qalaad oo dahabka ah, kambiyaalaha iyo lacago la geliyeyo ha ahaato xisaab socota ama ha ahaato saamiyo amaaheed, ee heerka kowaad;
5) adeegga keydka haynta, diibaajiga ama qaab kale loo xiray;
6) adeegga dhigaalka xisaabta socota iyo kan keydka, ha lahaado mid dulsaar leh ama dulsaar laáan ah oo dib loogu soo celin karo aragti ama muddo.

Sanduuqa sidoo kale waxa uu awoodaa inuu fuliyo hawlgallada ama adeegyada soo socda:

a) gadashashada ama dhisidda dhismooyin loogu talagalo inuu u isticmaalo xafiisyo kuwiisa ah ama shaqaalihiisa;
b) ururinta loo uruurinayo dad gaar ah, shirkado iyo hay'ado akhlaaqi ah,oo fulinta saamiyo amaaheedyada lagu dalbi karo Soomaaliya gudaheed iyo dibeddaba, iyo caadiyan, adeeg khasnadeed oo loo qabanaayo biimana ku ah dadka saddexaad (saddexeeyaha ah);
d) adeegga khasnadda iyo sidoo kale; adeegyada kale iyo hawlaha kale oo loo qabanayo Maamulka Dhulka Soomaaliya iyo Xukuumadda Soomaaliyeed, sida ay qabaan axdiyo khaas ah.

Qodobka 21aad, faqradda labaad waxaa loo baddalay sida soo socota:

"Qabashada korjoogteynta howlaha Sanduuqa, xagga wixii la xiriira wareejinta lacagta, waxaa caadi ahaan sameeya korjooge (hubiye/kormeere/ilbaadiye), oo hawlihiisa, markuu maqan yahay ama ay jirt caqabad uu qabanayo qof bediil u ah (ku-xigeen).

Korjoogaha (ilbaadiyaha/hubiyaha/kormeeraha) ayaa sidoo kale soo dhexgala, korjoogteyn darteed, kulamada Guddiga Fulinta ee ku xusan xarafka q), ee qodobka 6aad, korjoogaha iyo ku-xigeenkiisa waxaa magacaaba Wasiirka Khasnadda iyo Maamulka Soomaaliya.

Xeerkan waxa uu ku-dhaqan yeelanayaa laga bilaabo 1da Janaayo 1959.
Xeerkan, oo leh (saaran tahay) shaabadda Dowladda. waxaa la gelinayaa Ururinta rasmiga ah ee sharciyada iyo xeerarkaka Jamhuuriyadda Talyaaniga. Cid kasta oo mas'uul ka ah waxaa waajib ku ah inay ilaaliso kuna ilaalisa cidkasta.

Rooma, maanta oo 2da Disember, 1958.

**GRONCHI**

**Fanfani-Andreotti**

Waa arkay, Diiwaanhayaha: **Gnella**

Waxaa laga diiwaangeliyey Maxkamadda Xisaabaadka

Maanta oo ah 31ka Diseember 1958,

Qoraallada Xukuumadda diiwaan, lamba. 115, Xaashi, lamba. 170,